

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA
SARE

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD. 2019

SAYNIS



XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND



WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE
XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

Code Number

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD, 2019
AMIN 2 SAAC IYO 10 DAQIIQO AKHRIS AH

SAYNIS

TILMAAMAHA IMTIXAANKA

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahay 7 bog
- Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Haku qorin magacaaga iyo Roll lambarkaaga toona warqadda imtixaanka
- Hubi in waraaqda lifaaqu ku dhegen tahay imtixaanka, hadday kaa maqan tahay u sheeg ilaaliyaha imtixaanka.
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah
- Jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah.

Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:

QAYBTA	DHIBCAHA
Qaybta 1aad: Goobo geli	20 dhibcood
Qaybta 2aad: Ka jawaab suaalaha	80 dhibcood
Wadarta: 100 Dhibcood	

Waxaaiskalehsaxaha

QAYBAHA	DHIBCO
QAYBTA 1AAD	
QAYBTA 2AAD	
WADAR	%

QAYBTA 1AAD: GOOBO GALI JAWAABTA SAXDA AH

(20 DHIBCOOD)


1. Aadanuhu wuxuu qashin ahaan usoo saaraa

A) H_2O C) O_2 B) CO_2 D) H_2

2. Walax ayaa leh dherer 20sm , ballac 5sm iyo joog 4sm haddaba muggeedu waa

A) 200 sm^3 C) 400 sm^3 B) 300 sm^3 D) 500 sm^3

3. Jabaqda ku calaamadsan T waxaa lagu magacaabaa



A) Jabaq ileys

C) Jabaq noqod

B) Jabaq socod

D) Jabaq kiimakeed

4. Wax kastoo noolaha ku hareereesan waxaa loo yaqaan

A) Cimilo

C) Cimilo-gooreed

B) Deegaan

D) Hawo

5. Marka aysiidh lagu darro bays waxaa samaysma

A) Cusbo +biyo

C) Bays+ Biyo

B) Alkali+aysiidh

D) Bays+aysiidh

6. Walaxdan hoose waxaa si fudud loogu kala saari karaa

- A) Ciid iyo sulfar
- B) Ciid iyo Sonkor
- C) Ciid iyo Bir
- D) Ciid iyo Cusbo



7. anemoomitirka waxaa lagu ogaadaa dabaysha.....

- A) Dhaqsaheeda
- B) Jihadeeda
- C) Xooggeeda
- D) Cadaadiskeeda

8. Marka dareere liin ah lagu daro litmas buluug ah, litmasku wuxuu yeelanaya midab ah

- A) Cagaar
- B) Buluug
- C) Casaan
- D) Jaalle

9. Shaqada ugu muhiimsan ee xididku qabto waa

- A) Soo nuugista biyaha
- B) Kala badalida hawada
- C) Samaynta biyaha
- D) Samaynta cuntada

10. Hawadu 78% waxay ka koobantahay

- A) Ogsijiin
- B) Naytarojiin
- C) Kaarboon labo ogsaydh
- D) Haydaroji

QAYBTA 2AAD: KA JAWAAB SU'AALAHAA SOO SOCDA

(80 DHIBCOOD)

SU'AASHA 1AAD

(6 DHIBCOOD)

- A) Ashiidhan u kala saar mid dabiici ah iyo mid aan dabiici ahayn (4 dhibcodd)

Salfuyuurik asiidh, Sitrik asiidh, laktic asiidh, haydrokaloorik asiidh

Asiidh dabiici ah	Asiidh aan dabiici ahayn
1.	1.
2.	2.

- B) Maxaa soo baxa markii Asiid lagu daro bir?

(2 dhibcodd)

SU'AASHA 2AAD

(7 DHIBCOOD)

Sawirkan hoose wuxuu muujinaya ubax cayayaanku faxliyo.

- a) Qaybee ayaa

- i) Soo saarta Faxalka _____ (2 Marks)

- ii) Difaacda geedka _____ (2 Marks)


- iii) Soo jiidata cayayaanka _____ (2 Marks)

- b) Qeex shaqada ay qabato qaybta ku calaamadsan C

(2 Marks)


- c) Qeex micnaha eragay "Faxlin"?

(2 Marks)



SU'AASHA 3AAD**(7 DHIBCOOD)**

- a) Adigoo adeegsanaya sanduukhan hoose Ku Sawir mareeg koronto adigoo ku muujinaya Bateria, Daare-damiye iyo Laambad (3 dhibcood)



- i) Waa maxay shaqada Bateria?

_____ (2 dhibcood)

- ii) Waa maxay sababta laambad loogu xiro mareegta koranta?

_____ (2 dhibcood)

SU'AASHA 4AAD**(12 DHIBCOOD)**

- A) Isku-aadi cudurka iyo waxa gudbiya

(10 dhibcood)

CUDURADA	JAWAAB	WAXA GUDBIYA
1. Daacuun		A) Isla wadaagida shanlada
2. Duumo(Malaaryo)		B) Hawo wasokhaysan
3. Cambaar		C) Qaniinyada cayayaanka
4. Waraabowga		D) Cunto wasakhaysan
5. Hargabka		E) Galmada qof jiran

- B) Waa maxay bakteeriyo?

_____ (2 dhibcood)

SU'AASHA 5AAD

(8 DHIBCOOD)


Sawirkan hoose wuxuu muujinaya Kabbaal.

- a) Isku aadi qaybaha ku calaamadsan W, X iyo Y ee Sawirka hoose iyo Magacyadooda oo kala ah Culays, Barkin iyo awood

W _____ (1 dhibic)

X _____ (1 dhibic)

Y _____ (1 dhibic)



- b) Sheeg nooca kabbaalka uu yahay sawirka kor ku xusan? _____ 1 dhibic
- c) Faadumo ayaa adeegsatay xoog dhan 10N kuna qaaday walax waxayna saartay meel joogeedu tahay 4 M. Soo saar hawsha la qabtay.

_____ (2 dhibicood)


- d) Walax cufkeedu yahay 500 g iyo mug dhan 50 cm³, hadaba soo saar cufnaanta walaxda?

_____ (2 dhibicood)

SU'AASHA 6AAD

(7 DHIBCOOD)

- a) Isku aadi lambarada 1, 2, 3 iyo 4 sawirka ku yaal iyo magacyadooda A, B, C iyo D ee ku jira jaantuska hoose (4 dhibicood)



MEERTADA RAHA	LAMBAR
A. Rah weyn	
B. Lulumo	
C. Rah yar	
D. Ugxan	

- b) Sidee ayuu raha labi u soo jiitaa ta dheddig ka hor isutagga (galmada)?

_____ (2 dhibicood)

- c) Muddo intee le'eg ayaa ay ku qaadataa ugxanta bacrinsani in ay ku dilaacdo si ay lulumo u noqoto?

_____ (1 dhibic)

SU'AASHA 7AAD

(10 DHIBCOOD)

Sawirkan hoose wuxuu ku saabsan yahay unugyo kala duwan

- a) Unugee ayaa qaabilsan difaaca jirka?

_____ (2 dhibcodd)

- b) Unugee ayaa qaabilsan taranka dhedigga?

_____ (2 dhibcodd)

- c) Unugee ayaa qaabilsan taranka ragga?


_____ (2 dhibcodd)

- d) Unugee ayaa qaabilsan qaadista ogsijiinta?

_____ (2 dhibcodd)

- e) Unugee ayaa qaabilsan qaadista fariimaha maskaxda?

_____ (2 dhibcodd)




SU'AASHA 8AAD

(4 DHIBCOOD)

Sawirkan hoose wuxuu ku saabsanyahay footoosintisis.

Ku buuxi meelaha banaan ee sawirka dushiisha erayadaan soo socda (4 dhibcodd)

Kaarboon labo ogsaydh, Ogsijiin, Biyo, Cunto(Sonkor),



SU'AASHA 9AAD

(10 DHIBCOOD)

Sawirkan hoose wuxuu muujinaya shabakad cunto.

- a) Sheeg magacyada quud-sameeyayaasha ku jira shabakadda cuntada hoose?

_____ (3 dhibcood)

- a) Imisa xayawaan ayaa ku tiirsan Kaarootada?


_____ (2 dhibcood)

- b) Adigoo adeegsanaya sawirka kore, sawir silsilad cunto oo ku dhammaanaysa dheefsadaha seddexaad?

_____ (4 dhibcood)

- c) Maxaa ku dhacaya kaarootada hadii bakeyluhu dhinto?

_____ (1 dhibic)



SU'AASHA 10AAD

(9 DHIBCOOD)

- a) Qor labo siyaabood aad naftaada uga badbaadin karto miinada?

_____ (2 dhibcood)

- b) Sheeg labo wax yaabood oo aynu ka helno dhirta?

_____ (2 dhibcood)

- c) Maxaa aad u malaysanaa in ay dhici doonto marka ay carradu ku wasakhawdo bacaha iyo taayarrada gawaarida?

_____ (2 dhibcood)

- d) Waa maxay noocyada dillaacinta uguna ee dhaqashada digaagga?

_____ (2 dhibcood)

- e) Sharrax faaiidada ay xiddkaha u leeyihiin bad-maaxayaasha?

_____ (1 dhibcood)

Dhammaad.